

# Adiga iyo suuxintaada

Warqadan waxay ku siineysaa macluumaad kaa caawinaayo isu diyaarinta suuxintaada. Waxaa qoray suuxiyeyaal wadajir ula shaqeeynaayo bukaanada iyo wakiilo matalaayo bukaanka. Waxay sidoo kale ku tuseeysaa halka laga helo macluumaadka kale ee waxtarka noqon kara.

## Waa maxay suuxdintu?

**Suuxdinta** waxay joojisaa xanuunka iyo dareemada aan wanaagsaneen. Waxaa loo bixini karaa qaabab badan umana baahno goor kasto inay kaadhigto qof miir-daboolan.

Waxaa jira noocyo kala duwan oo suuxin ah, kuwaasoo ku tiirsan qaabka loo bixiyo:

**Suuxin maxali ah** Waxay ku lug leedahay cirbado kuwaasoo dareenka ka qaadaayo qeeb yar oo jirkaaga ah. Miir-qab ayaad ahaaneysa laakiin ka madax-banaan xanuun.

Suuxin goboleed, sida laf-dhabarta ama qaarka dambe, waxay ku lug leedahay cirbado dareenka ka qaadaayo qeeb weyn ama qoto dheer oo jirka ah. Miir-qab ayad ahaaneesaa ama xasilnaan ayad helesaa, laakiin aan laheen xanuun. Qaliimada qaar waxaa laga yaabaa in aad ka war-hayso cadaadiska dareemada.

**Suuxinta guud** waxay bixisaa xaalad miir-daboolnaan la maamulo. Waxay muhiim u tahay qaliimada iyo nidaamyada qaar. Waxaad tahay qof miir-daboolan oo aan dareemeyn.

Xasilnaanta maskaxeed waxay bixisaa xaalad 'hurdo u eg' inta badanna waxaa loo adeegsadaa suuxinta maxaliga ama gobolka. Dejinta waxay noqon kartaa mid fudud ama qoto-dheer waxaana laga yaabaa inad xasuusato wax kasto, waxyaabaha qaar ama waxbo kadib Dejinta.



Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan dejintafadlan arag warqaddeena lagu sharaxay dejinta tassoo laga heli karo boggeena: [rcoa.ac.uk/patientinfo](http://rcoa.ac.uk/patientinfo)

## Adiga iyo suuxintaada

### Suuxiyeyaalka

Suuxiyeyaalka waa takhaatiir leh tababar takhasuseed kuwaasoo:

- Kaala hadla nooca ama noocyadaa suuxinta ku haboon qaliinkaaga Haddii ay jiraan dookhyo, waxay kugu caawinayaan inad kala doorato
- Adiga kaala hadla halista suuxinta
- Kula gaaro qorsho is-afgarad kusaabsan xakameynta suuxintaada iyo xanuunka wixi ka dambeeya
- kusiinaya dawada suuxintaada kana masuul ah amniga iyo badqabkaaga guud ahaan qaliinkaaga iyo gudaha qolka soo bogsashada.

Waxaa kaloo lagayaabaa in aad la kulanto suuxiye-lajir kuwaasoo ah xirfadlayaal caafimaad oo si heersare ah u tababaran. waxaad ka akhriin kataa doorkooda iyo kooxda suuxinta bogeen:

[rcoa.ac.uk/patientinfo/anaesthesia-team](http://rcoa.ac.uk/patientinfo/anaesthesia-team)



## Xarunta bukaan socod eegtada ee qiimeenta qaliinka ka hor (xarunta caafimaadka qiimeenta hore)

Haddii aad leedahay qaliin qorsheesan waxaa laga yaabaa in laguugu casumo/yeero qiimeenta ka hor qaliinka xarunta bukaan-eegtada dhoor isbuuc ama maalmo ka hor qaliinkaaga. Mararka qaar, qaliinka yar, kalkaaliye ayaa taleefoon kusoo diraya si uu kuu weydiyo su'aalo.

Fadlan la imow:

- Qoraalada dhaqtarka (warqadaha dawada) ama keen dawooyinkaaga siday dhamaan u baakadeeysanyihiin
- wax kastoo aqabaar ah ee kusaabsan baaritaano iyo dawaynta isbitaalada kale.
- aqbaaraadka ku saabsan wax kastoo dhibaato ah oo adiga ama qoyskaaga laga yaabo inay ka qabsatay suuxinta.
- wax kastoo cabirada dhiig karka oo dhowaan ah


waxaa lagu talinayaa in dhiig kar kaaga lagu baaro dhaqtarkaaga guud ee qaliinka marka uu dhaqtarkaaga guud kuu gudbiyo qaliin qaabkan, haadii uu dhiig-kaaga sareeyo, daawada waxaa la bilaabi karaa ka hor qaliinka Haddii aad rabto in aad dawo bilowdo iyo hadii kale, waa muhim in aad keento qoraalka cabirada dhow ee dhiig-karka

kalkaaliyayaasha Bukaan socod eegtada waxay:


- Si faahfaahsan kuu weydin doonaan wax ku saabsan hawlahaaga iyo dhibaatooyinka caafimaadkaaga maskaxda iyo kan jirka.
- Waxay ku weydin doonaan wax ku saabsan xasaasiyad ama fal-celin (fadlan keen faahfaahinada)

## Adiga iyo suuxintaada

- Waxay qoraal sax ah ka sameeyn doonaan dawooyinka aad qaadato, kuwaasoy ku jiraan xanuun baabi'iyayaasha muddada fog
- Waxay ku weydiin doonaan haddii aad sigaar dhuqdo, aalkolo cabto ama aad qaadato dawooyinka maanka dooriya
- Waa ay ku miisaami doonaan weyna ku cabiri doonaan
- Dhiigkar kaaga ayay cabiri doonaan waxayna fiirin doonaan garaaca wadnahaaga iyo heerka hawada
- Waxay dhageysan doonaan wadnahaaga iyo feerahaaga haddii loo baahanyahay
- Waxay diyaarin doonaan dhiig baaris hadba sida loogu baahdo.
- Waxay sameeyn doonaan ECG (baaridda wadnaha)
- Waxay kaaqaadi doonaan tijaabo sanko ama jirka si loo baaro wixii caabuuq ah
- Waxay kaala talin doonaan dawadaad qaadanayso maalinkaad qalliinkaaga galayso iyo xanuun baabi'iyayaasha aad guriga ku diyaarsaneyso soo bogsashadaada ugu diyaarsaneyso
- Waxay ku siin doonaan aqbaar kusaabsan dhiig shubida hadii ay u maleeyaan in aad u baahantahay.

 Dhiig ku shubida waa laga fogaadaa inta badan inay tahay maarmaan mooyaane. Waxa kale oo aad macluumaad ka heli kartaa bogga NHS:

[nhsbt.nhs.uk/what-we-do/blood-services/blood-transfusion](https://nhsbt.nhs.uk/what-we-do/blood-services/blood-transfusion)

 Fadlan akhri warqaddeena suuxinta la sharxay haddii aad jeclaan laheed inaad akhrido macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan suuxinta: [rcoa.ac.uk/patientinfo/anaesthesia-explained](https://rcoa.ac.uk/patientinfo/anaesthesia-explained)

## Kahor immaashada isbitaalka.

Waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameyn kartid si aad naftaada ugu diyaarisid qalliinka iyo mudada soo kabashada.

- Haddii aad sigaar cabto, joojinta dhowr toddobaad kahor qalliinka waxay yareyn doontaa halista dhibaatooyinka neefsashada inta lagu jiro suuxintaada iyo kadib qalliinkaaga.
- Haddii aad cayil badan leedahay, yareynta miisaankaagu waxay yareyn doonaa khataraha badan ee dheeraadka ah ee aad wajahi karto inta lagu jiro suuxinta iyo qalliinka ka dib. Sidoo kale qalinka aya y sahli kartaa.
- Haddii aad leedahay ilko jilicsan ama la buuxiyay, booqashada dhakhtarkaaga ilkaha kahor qalliinka ayaa yareyn kara halista dhaawaca ilkahaaga inta lagu jiro suuxinta.
- Haddii aad qabtid dhibaato caafimaad oo muddo dheer jirtay oo aad dareento inaan si wanaagsan loo xakameyn karin (tusaale ahaan cudurka macaanka, neefta ama boronkiitada, dhibaatooyinka qanjirka tayrood, xanuun daba dheeraada ama dhibaatooyinka wadnaha), ka hubi GP-gaaga inuu jiro wax aad sameyn karto oo aad ku hagaajiso.
- Waxa kale oo muhiim ah inaad tixgaliso wixii arimo caafimaad maskaxeed ah sida walaac iyo niyad jab, maadaama kuwan laftoodu wax weyn ku soo kordhin karaan qalliinkaaga iyo soo kabashada.

## Adiga iyo suuxintaada

- Kordhinta hawlahaaga toddobaadyada ka hor qalliinka ayaa kor u qaadi kara shaqada wadnahaaga iyo heerarka taam ahaanshaha Daraasaduhu waxay muujiyeen tani inay isbeddel weyn ku sameeyni karto kasoo bigsashadaada qalliinka.
- Waxa ugu fiican inaad horey u qorsheysatid soo kabsashadaada guriga ka dib oo aad u oggolaatid asxaabtaada iyo qoqoyskaagaynaya ogaadaan sida ugu wanaagsan ee ay kuu caawin karaan. Ka fikir waxaad cuni doontid iyo inaad u baahan tahay inaad wax isbeddel ah ku sameyso guriga si aad uga bogsato.
- Haddii aad ku soo noqoto guriga isla maalinta aad qaadatay suuxin guud ama suuxin, waxaad u baahan doontaa inaad abaabusho qof qaangaar ah oo mas'uul ah inuu guriga kuugu qaado baabuur ama taksi oo uu kula joogo ilaa 24 saacadood. Macluumaadka loogu talagalay dadka daryeela qof kaasoo suuxin guud ama suuxin hadda kasoo baxay waxaa laga heli karaa bogga: [rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation](https://rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation)
- Waa muhiim inaad ka fekerto sida ugu fiican ee aad u nasan karto maalinta qalliinkaaga maadaama laga yaabo inaad sugto ka hor qalliinka. Wargeeysyadaa, halxiraalayaasha ama dhagaysi muusig iyadoo la isticmaalayo qalabka dhegaha ayaa dhamaantood waxtar yeelan kara.

i

**Qalabkayaga Fitter Better Wuxuu si dhaqso ku siin doonaa macluumaadka aad ugu baahan tahay inaad noqoto mid kugu habboon oo sifiican ugu diyaargarobaya qalliinkaaga. Fadlan ka eeg degelkeena macluumaad dheeri ah:** [rcoa.ac.uk/fitterbettersooner](https://rcoa.ac.uk/fitterbettersooner)

i

## Maalinta qalliinka

Cisbitaalka waa inuu ku siiyaa tilmaamo cad oo kusaabsan cunida iyo cabitaanka. Tilmaamahaani waa muhiim. Haddii uu jiro raashiin ama dareere ku jira calooshaada inta lagu jiro suuxinta, waxay imaan karaan hungurigaaga iyo sambabbadaada waxayna khatar gelinaysaa noloshada.

Haddii aad leedahay **sonkorow fadlan** ka hubi cisbitaalkaaga waxa ku saabsan **goorta aad joojineyso cunista iyo cabitaanka iyo sida aad u qaadaneysid daawada** maalinta qalliinkaaga.

Haddii aad sigaar cab tahay waa inaadana sigaar cabbin maalinta qalliinkaaga, maadaama ay tani yareynayso qaddarka hawada kujira dhiiggaaga. Sidoo kale waa inaadana ka tagin.

**Haddii aad dawo qaadaneysid**, waa inaad raacdaa tilmaamaha qaaska ah ee kooxda qiimeynta qalliinka kahor sida loo qaato maalinta qalliinka. Waxaa lagu oggol yahay kabasho biyo ah oo laqdid kaniiniyada kasta sida loogu baahanyahay.

Haddii aad qaadaneysid wax 'dawooyinka dhiig khafiifinta' sida warfarin, clopidogrel ama rivaroxaban, waxaad u baahan doontaa inaad kala hadasho la-taliyahaaga ama kooxda qiimeynta qalliinka kahor haddii aad ama goorta aad joojineysid qaadashadooda. Waxay eegi doonaan wixii khataro dhiigbax ah iyo khataraha joojinta dawada qorshana way kula sameen doonaan. Kalkaalisadaada ayaa kusiin doonto tilmaamo cad cad kahor qalliinkaaga.

## Adiga iyo suuxintaada

Hadii aad xanuun dareento markaad rabto inaad imaado cisbitaalka, fadlan soo wac kalkaaliyaasha si ay kuuwaaniyaan.

Fadlan iska bixi waxa cidiyaha kuugu jiraan intaadan cisbitaalka imaanin kahor. Tani waxay xaqiijineysaa in qalabka fartaada lagu xiri doono si loo cabbiro heerarka oksijiinku ay u shaqeynayaan si fiican inta lagu jiro suuxinta.

### La kulanka suuxiyahaaga

Takhtarka suuxinta ayaa kula kulmi doona qalliinka ka hor Waxaad kula kulmi kartaa wiisatada qiimeynta qalliinka ka horreysa ama maalinta qalliinkaaga. Waxay ka wada hadli doonaan nooca suuxinta lagu siin karo, oo ay ku jiraan faa,idooyinka, khataraha iyo waxyaabaha aad doorbidayso.

Iyaga aya kula go'aansan doonaan suuxinta adiga ku fiican. ma ahan dhammaan noocyada kala duwan ee daawada suuxinta in ay ku haboonyihin nooc kaasto oo qalliin ah.

Haddii ay jirto xulasho suuxin, go'aanka la adeegsanayo wuxuu ku xirnaan doonaa:


- qalliinka lagu sameyn doono adiga iyo wixii dhibaato caafimaad ah
- khatarahaaga gaarka ah
- waxyaabaha aad doorbideyso iyo sababaha loogu talagalay iyaga
- talooyinka iyo xirfadaha gaarka ah ee takhtarka suuxinta
- qalabka, shaqaalaha iyo ilaha isbitaalka.

### Su'aalaha aad jeceshahay in aad weydiiso Takhtarka suuxinta ama kalkaalisada

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan suuxintaada, qor ama tixgeli tusaalooyinka ka soo horjeedda. Haddii aad rabto inaad la hadasho takhtarkaaga suuxinta kahor maalinta qalliinkaaga, la xiriir kooxda qiimaynta ka hor inta aan la gaarin qalliinka ku wa soo kuu diyaarin doona inaad taleefanka kula hadasho suuxiyaha ama aad ku aragtid xarunta caafimaadka.

### U diyaargarowga qalliinkaaga

Kalkaaliyahaaga ayaa ku siin doona dharka isbitaalka ee aad xiraneyso waxayna kaala hadlayaan hoosgashiga aad xiraneyso. Sida caadiga ah waxaad xiraysaa sharaabaado laastikada si aad u yareyso halista dhiig xinjirrowga lugahaaga Kalkaalisada caafimaadka ayaa ku dhejin doonta sharooto aqoonsi gacmahaaga ama canqowgaada isbitaalada qaarkoodna sharooto dheeraad ah ayay ku dhejin doonaan haddii aad wax aleerjik ah qabtid.



## Adiga iyo suuxintaada

Daawaynta hore. (a 'pre-med')ayaa mararka qaar la bixiyaa ka hor xoogahoo dawooyinka suuxinta. Pre-meds prep waa waa jirkaaga qalliinka - waxay bilaabi karaan joojinta xanuunka, yareynta aashitada calooshaama kaa caawin inaad is kalabixiso.

Kalkaaliso ayaa qaadi doona baaritaan uur ah o lagu sameynayo kaadida kaadi haddii aad tahay jira da'da dhalhada. tani waa dhaqanka caadiga ah.

Waa inaad iska bixisaa dahabka iyo/ama waxaalaha daloolinta qurxinta oo dhan. Haddii aadan iska saari karin, kalkaaliyeyaasha caafimaad waxay ku daboolidoonaan cajalad si looga hortago waxyeelo u soo gaarto ama maqaarkaaga. Faraantiga guurka caadi yanay xirato.

### marka lagu adiga lagu soowaco qalniinkaada

- Qof ka mid ah shaqaalaha ayaa kuu raacidoono qolka qaiinka.
- Sida caadiga ah waad xiran kartaa muraayadahaaga, qalabka gargaarka maqalka iyo ilkaha ah illaa aad qolka suuxinta ku jirto. Waa laga yaabaa inaad awoodo inaad ilaaliso ayaga oodhan hadii adiga aadan qabin suuxitaan guud.
- Haddii suuxin goobeed ama mid qaybeed, waxaad awoodi kartaa inaad qaadato aaladahaada elektaronic ah, sumeecado lagu dhagaysto musikada(hakaa fiiriso kalkaalasadada intaadan qaadanin).
- Adiga waad aadi kartaa qolka qaliinka adiga oo kuwahelinayaan qaar kamid ah shaqaalaha, ama waxaa ku aadi kartaa kursiga curyaanka ama adiga oo saaran korka sariirta ama bareelo . hadii adiga aad soconeysid, adiga waad xiran kartaa dharkaaga aad xirato iyo dacaskaaga.

Hubinta joogtada ah ayaa lasamayndoonaa markii aad imaado waaxda qalniinka, kahor intuusan bilaaban qalniinka. Adiga waxaa lagu waydiin doonaa magacaada, dhalashadaada, qalniinka aad leedahay, inuu yahay dhinaca bidixo ama dhinaca midig(haddii uujiro), Marka kuugu dambaysay oo aad wax cunto ama cabto hadii aad qabto wax xasaasiyad ah. hubintan waa kuwo joogta ku ah dhamaan cisbitaalada.

### Bilaabida suuxinta

Suuxintaada waxay kubilaami kartaa qolka suuxinta ama qolka qalniinka . Suuxiyahaaga wuxuu lashaqayn doonaa caawiye latababaray Dhaqtarka suuxinta ama caawiyaha wuxuu kugu xiri doonaa fiilooyinka mashiinada si loo cabiro heerka garaaca wadnahaaga, cadaadiska dhiigaagaiyo heerarka ogsijiinta iyo aalad kale oo loobaahdo.

kaanole tubo yar oo balaastig ah oo xididkaaga lagula galiyo cerbad waxaa badanaa loo isticmaalaa suuxdinta dadka waaweyn, oo eey ka mid tahay suuxdinta yar. Daawooyinka oo dhan ayaa ka dibna lagu siin karaa xididkaaga iyadoo la isticmaalayo cannula-ka. Haddii aad waxay walaac ah qabto , fadlan la hadal qofka ku suuxinayo.

# Adiga iyo suuxintaada

## Suuxinta goboleed iyo mid deegaan

Hadii laguugu sameyn rabo suuxinta maxaliga ama midda gobolka:

- Dhakhtarkaaga suuxiyaha waxuu ku weydiin doonaa in aad sameynin dhaqdhaqaaq inta lagu duraayo . Waxaa laga yaabaa in aad dareentid jariiraco diiran saameeynta daawada suuxinta oo bilaabaneysa awgeed.
- Qaliinkaaga waxuu hore ugu soconayaa kali ah marka Dhakhtarkaaga suuxiyaha iyo adiga aad isla xaqiisaan in ay meesha eey kabaabyeysantahay.
- waxaad sii ahaaneysaa mid foajigan oo ka warqaba agagaarkaaga, in aad suuxsan tahay mooyee. Shaashad ayaa kaa jooji doonto in aad aragtid qaliinka illaa aad adiga rabtid maahane
- Suuxin goboleedda , qof ka mid kooxda suuxdinta ayaa Marwalbo adiga kuugu dhow waadna lahadli kartaa markasta oo aad rabto.

## suuxinta guud

Waxaa jirta labo hab oo lagu bilaabi karo suuxinta guud:

- daawada suuxdinta ayaa lagu duri karaa xididka ayadoo la isticmaalayo kaanoolaha. Mid kaan waxaa guud ahaan loogu isticmaalaa dadka waaweyn in badana waa la xakameeyaa
- waxaad awoodaa in aad ku neefsatid gaaska suuxinta iyo oksijiinka adigoo maaskaro wata taasoo aad qabo kartid hadii aad rabtid. Marki aad miir beeshid qofka ku suuxinaayo ayaa kaanoole gelinaayo

## Qolka bogsashada

Qaliinka ka bacdi, waxaa badanaa lagu wadayaa qolka bogsashada. Shaqaalaha kasoo bogsashada waxay xaqiijin doonaan in aad tahay sida qof u fiican sida suurto-galsan waxayna kusiinayaan daaweeyn kastoo dheeraad ah oo laga yaabo inaad u baahato. Marka ay ku qancaan in aad si amaan ah uga soo bogsatay dawooyinkaaga suuxinta sariirna la heli karo, waxaa lagu celin doonaa qolka jifka buukaanka..

## Xanuun baabi'iyee qaliinka ka bacdi

Nooca iyo caddadka xanuun baabi'iyee lagu siin doono waxay ku xirnaan doontaa qalliinka aad leedahay iyo heerka xanuunkaga kadib qaliinka. Dadka qaar waxay u baahanyihiin xanuun baabi'iyee badan si ka duwan kuwa kale.

Guud ahaan, xanuun xoogaa ama raaxo la'aan waa leeska filanaa inta aad reesaneysid. Xanuun baabi'yayaal adag ayaa u fiicnaan kara xanuunka joojinta , laakiin waxaa laga yaabaa in ay yeeshaan waxyeelo, sida daacquran iyo ku qabatin muddada dheer.

Marmarka qaar, xanuunka waa digniin in wax walbo uunan fiicneyn, markaa waa in aad la socodsiiisaa kalkaaliya yaashaada oodna raadsataa talo iyo caawimaad.

Waa kuwan siyaabaha loo bixiyo xanuun baabiyo:

- kaniiniyo ama cabitaano la laqo kuwaan waxaa loo isticmaalaa nooc walbo oo xanuun ah. Caadi ahaan waxeey qaataan ugu yaraan nus saac si eey u shaqeeyaan. Waxaa lagaaga baahanyahay in aad awoodid in aad cuntid, cabtid iyo aadan dareemin xanuun si eey daawooyinkaan u shaqeeyaan

## Adiga iyo suuxintaada

- Durida - kuwaan waxaa iska dhacda in eey xidida galaan (kanuulada u gudbeeyso xididka si eey u saameeyso si deg deg ah) ama gudaha murqaha (lugtaada dhexdeeda ama muruqa dabadaada iyadoo la isticmaalaayo cerbad, qaadaneyso qiyaastii 20 daqiiyo si eey u shaqeeysa)
- subboosta - tubo adag waxaana la galinayaa dabadaada (mariinka dambe). Kuwaas oo dhalaala iyo daawada waxeey u gudbee jirka dhaxdiisa. Waxeey leeyihiin waxtar hadii aadan awoodin in aad laqdid ama eey noqoto in aad mantagtid
- Xanuun baabi'iyee uu bukaanka kontoroolo/xakameeyo (PCA) - mashiin leh batoon la riixo taasoo, markaad riixdo, bixiso qiyaas yar oo xanuun baabi'iyee xoogan ah. Waxaa loo sameeyay inay xaqiijiso si aadan daawada qaadan qayaas dhaaf. PCA-ga waxuu kuu ogolaanayaa in aad si toos ah u xukuntid xanuun joojintaada.
- Dawooyinka suuxinta maxalliga ah iyo Waaxaha gobolka - suuxinta noocan ah waxay waxtar u noqon xanuun baabi'inta qaliinka kadib. Wixii faahfaahin ah waxaa laga heli karaa warqadaheena Xanuun baabiyaha qaarka hoose ee laf-dhabarta kadib qaliinka kaasoo laga heli karo degelkeena: [coa.ac.uk/patientinfo/leaflets-video-resources](http://coa.ac.uk/patientinfo/leaflets-video-resources)



## Xanuun joojinta marki aad ka baxdid cisbitaalka

Inkastoo lagu siinaayo daawooyin xanuun joojiye marki aad ka baxdid cisbitaalka, waxaa fiican in aad xanuun joojiyo ka gadatid dukaanka si eey diyaar kuugu ahaadaan guriga. Haddii aad weli u sii baahantahay lab o isbuuc kadib kasoo bixidda isbitaalka, waa inaad la xiriirta dhakhtarkaaga guud si aad uga wada hada shaan wax badan arintan.

qaliinkaaga kadib waxaa laga yaaba inaad guriga aaddo adigoo qaadanaayo xanuun baabi'iyayaal -nooc ahaan morphine ah. Waa muhiim inaad yarayso kadibna joojiso dawooyinkan sida ugu dhaqsaha badan ugana suurtagalsan sii wadidda isticmaalkooda oo kuugu keeni kara dhaawac wayn awgeed.

## khatartarta iyo suuxinta.

Sawir-qoraaleedka kujira qeebtan wuxuu soo bandhigayaa dhacdooyinka guud iyo khatarahay wajahaan bukaanada qaagaarka ah ee caafimaadka qaba ee miisaankoodu caadi yahay marka suuxin guud loogu sameeynaayo qaliino joogtada ah aad u ( qaliinada takhasuska gaarka leh waxaa laga yaabaa inay wataan qataro kala duwan).

Dawooyinka Suuxinta ee casriga ah waa amaan. Waxaa jira waxyeelooyin yar oo ka oo ka imaada dawooyinka suuxinta ama qalabka loo adeegsado, kuwaas oo badanaa ahayn wax aad u daran ama u waara. Shaqsiyaadku way ku kala duwanaa doonaan khatarahu waxayna ku xirnaan doontaa qaabka iyo farsamada loo isticmaalo.

Suuxiyahaaga ayaa kaala hadli doona khataraha ay aaminsayahiin inay adiga muhiim kuu yihiin. Waxaa jira khataro kale oo aan badneen kuwaas oo suxiyahaaga si caadi ah kaagala hadli doonin si joogto inay aaminsanyihiin in aadiga khatar wayn kujito mooyaane. Kuwani laguma soo bandhigin warqadan.



# Adiga iyo suuxintaada



Aad ugu badan-in ka badan 110kiiba  
U dhiganta hal qof qooyaskaaga ah



Jiro



Qarqaryo/  
Dhaxan



Haraat\*



Cuna xunuun



Nabar/Dhaqar



Xasuus lumin gaaban  
(badanaa wixii sareeya  
60danaadka)



Ku badan inta udhaxaysa 10 kiiba iyo 100kiiba  
u dhiganto hal qof oo sugan dariiq



Xanuun halka cirbadda lagu duro \*



Dhaawac yar oo bishinta ah ama  
carabka ah



Ku yar- inta u dhaxaysa 1- 100kiiba iyo 1- 1000kiiba  
u dhiganto hal qof kusugan tuulo



Dhaawac yar oo neerfaha ah



naadir- inta u dhaxeysa 1 qof 1,000kii qofba iyo 1 qof 10,000 ee qof  
U dhiganta hal qof oo ku sugan magaalo yar



**1 qof 1,000kii qof**  
dhaawac  
dareemayaasha  
kasoo waara



**1 qof 2,800 qof**  
Jareexada isha  
(xagtin isha  
dusheeda



**1 qof 4,500ti qof**  
dhaawac ilkaha oo  
u baahan daaween



**1 qof 10,000  
ee qof**  
Xasaasiyad  
(cuncun daran  
oo ka ficil-celinta  
dawada ah



Aad naadir ugu ah 1 qof 10,000 qof ilaa 1 qof 100,000 ee qof ama kabadan  
U dhiganta hal qof oo sugan magaalo balaaran



Khataraha aan galno nolosha caadiga ah, **sida safarka waddada**, ayaa xaqiiqdi aad  
uga sareeya khataraha hoose.



**1 qof 20,000 qof**  
Wacyi-gelin inta gudo jiro suuxinta



**1 qof 100,000 qof**  
Aragtida oo lunto



**1 qof 100,00 qof**  
Dhimasho toos uga  
dhalato suuxinta

\*Daraasadda (SNAP-1) mashruuca oradka ee suuxinta qaranka. Br J Anaesth 2016  
(<https://academic.oup.com/bja/article/117/6/758/2671124>).



hadii aad dooneyso inaad aqrisato faahfaahsan badan oo kusaabsan dhacdooyinkan iyo  
khataraha fadlan eeg warqadaha halista shaqsiga ee laga heli karo degelkeena:

[rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk-leaflets](http://rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk-leaflets)

Sidoo kale sawir-qoraaleedka kore ayaa sida gooni ah looga dejisan karaa lifaaqa kore

## Adiga iyo suuxintaada

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan [halkaan](#) riix.

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. fTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

## Noo sheeg waxaad u malayso

Wan soo dhawaynaynaa talo soo lagu hormarinaayo warqadan.

Haddii aad heyso faalo ah oo aad jeclaan laheed in aad bixiso, fadlan ku soo dir iimeeylka: [patientinformation@rcoa.ac.uk](mailto:patientinformation@rcoa.ac.uk)

### Royal College of Anaesthetists

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG  
020 7092 1500

[rcoa.ac.uk](http://rcoa.ac.uk)



## Daabacaaddi shanaad, Febraayo 2020

warqadan waxaa dib loogu noqon doonaa sadex sano guddahood taariikhda daabacadda

© 2020 Royal College of Anaesthetists

warqadan loo koobisan karaa ujeeddada soo saaridda qalabka macluumaadka bukaanka, Fadlan xigo ishan asalka ah. haddii aad daneyneesid inaad u isticmaasho qayb kamid warqadan ah daabacaad kale, waa in la bixiyaa mahadcelinta ugu haboon lagana bixiyo astaamaha, sumadeynta iyo sawirada. Macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.